



## Bakhtiyaanasiibka dugsiga sare oo furmaya Noofambar 8

Bakhtiyaanasiibka Doorashadda Dugsigu wuxuu bilaabmi doonaa laga bilaabo Noofambar 8 ilaa 30. Ardayda daneynaysa in dhigtaan dugsiga aan ka ahayn dugsiga sare ee xaafadoodu waa in ay codsadaan in ay dhigtaan dugsiga la kala dooranayo ama dugsiga bedel ah. Dugsiyadani waxaa ka mid ah [Dugsiga Sare ee Farsamada ee Benson](#), [Dugsiga Sare ee Jefferson-Kulliyadda Dhexe ee loogu talagalay Waxbarashada Horumarsan](#), iyo [Xarunta Barashada ee Magaalada](#).

Wixii macluumaad ah, la taliyahaaga dugsiga ama Xarunta Diiwaangelinta iyo Bedelka kala xiriir 503-016-3205. Codsiyada loogu talagalay bakhtiyaanasiibka waxaa [laga heli doonaa internet-ka](#).

Qoysaska iyo ardayda fasalka siddeedaada waxay sidoo kale booqan karaan dugsiyada taasi oo loogu talagalay habeenada soo socda ee macluumaadka la helayo si ay waxyaabo dheeraad ah uga ogaadaan barnaamijyada gaarka ah ee dugsiga. Fiiri [Jadwalka Habeenka Macluumaadka Ardayda Fasalka Siddeedaad ee 2018-19](#) wixii la xiriira taariikhaha iyo wakhtiyada.

Ardayda fasalka siddeedaad ee ku nool goobta laga kala imaanayo ee Jefferson waxay leeyihiin gelitaan la hubo oo ay gelayaan Jefferson ama dugsiga sare oo dhammeystiran oo loo qoondeeyay iyada oo la eegayo cinwaanka. Qoysaska Jefferson waa in ay buuxiyaan foomka kala doorashada isku qoondeynta labada ah 'dual-assignment choice' muddo aan ka dambeyn Jimcaha, Diisambar 7.